

# XAQIIJINTA TIXGELINTA LOO HAYO NOLOSHA IYO SHARAFTA SHAQSIYAADKA LAGA QAADAY XORIYADDOODA

FAAHFAAHIN GAABAN

COMITE INTERNATIONAL GENEVE

ICRC



## XABSIYADA KU JIRA

Maalin kasta rag, haween iyo carruur ayaa waxaa laga qaadaa xoriyaddooda waxaana soo wajaha khataro ay ka mid yihiin dil maxkamad la'aan ah, waayis qasab ah iyo jir-dil. Waxay lumin karaan xiriirka ay la leeyihiin qoysaskooda ayna la kulmi karaan xaalado ka baxsan aadminimada sida cunto yaraan, biyo la'aan iyo caafimaad darro.

## TAN IYO 1870KII

Ilaa iyo sanadkii 1870kii, Guddiga Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas (ICRC) waxay ku dadaalaysay inay hagaajiso xaaladda aadminimada ee dadka laga qaaday xoriyaddooda. ICRC-da waxaa aad loogu yaqaan howsheeda ay u hayso dadka lahaystayaasha ah ee loo qabqabtay khilaafyada hubaysan ee caalamiga ah iyo kuwa aan caalamiga ahayn iyo xaaladaha kale ee qalalaase. Duruufaha kale, ICRC-da waxay qaadataa talaabo mar kasta oo ay awoodo si ay u hagaajiso la macaamilka iyo xaaladaha dadka laga qaaday xoriyadooda. Intii lagu jiray 2017, ergada ICRC waxay 1,400 melood oo kuwa dadka lagu xiro ah oo ku kala yaala 92 aag oo caalamka ah ay ku sameeyeen in ka badan 4,400 oo booqasho. Mudada booqashada waxay la kulmeen 940,00 oo ah dad laga qaaday xorriyadda, kuwaas oo ay ku jiraan maxaabiis ay xukumeen maxkamado iyo xeer-beegti caalami ah. Waxay si shaqsi ah arrimahooda ugu kuurgaleen 35,274.



## UJEEDOOYINKEENA

ICRC-da waxay ujeedadeedu tahay inay sugto hab-dhaqanka wanaagsan iyo xaaladaha xariga ee kuwa laga qaaday xoriyadooda iyadoon la eegayn sababaha loo xiray ama loo haysto maxbuuska. Waxay kaloo raadisaa inay yareeyso dhibaatada qoysaskooda gaar ahaan iyadoo soo celinayso xiriirka ka dhexeeya lahaystayaasha iyo qaraabadooda. ICRC-da waxay ku dadaashaa, ahmiyad ahaan, inay ka hor tagto jir-dilka iyo qaababka kale ee si xun ula dhaqanka, inay ka hortagto ayna xaliso waayitaanka, inay hagaajiso xaaladaha xabsiyada (tusaale ahaan, helitaanka cunto, biyo iyo adeega caafimaadka), inay dib u soo celiso ayna joogtayso xiriirka qoyska iyo inay hubiso tixgelinta loo hayo badbaadada sharciga ah. Xaaladaha qaarka ah, ICRC-da waxay kaloo taageertaa maxaabiista la sii daayay iyadoo u fududeynaysa inay dib ugu noqdaan bulshada.



## QAABKA AANU U SHAQEYNO

Hawsha xabsiyada ee ICRC-da waxay ku salaysan tahay qiimeyn guud oo lagu sameeyo xaaladaha gudaha iyo dibada ee xabsiyada. Qiimeyntan waxaa fududeeya wadahadalo wax ku ool ah oo lala yeesho mas'uuliyiinta xabsiyada iyo booqashooyinka maxaabiista kuwaas oo ay saldhig u yihiin shan sharuudood.

ICRC-da waa in la siiyaa:

- oggolaansho ay ku arki karto dhamaan maxaabiista
- oggolaansho ay ku arki karto dhamaan dhismooyinka iyo tasiilaadka ay isticmaalaan ama loogu tala galay maxaabiista
- oggolaansho ah in marar kale la booqan karo
- suuragalnimada ah inay si xor ah iyo si asturan ahba ay ula hadasho maxaabiista ay doonayso
- balanqaad ah in mas'uuliyiintu ICRC-da u soo gudbiyaan liiska dhamaan maxaabiista ee goobaha ay daneynayso ama ay oggolaansho la siiyo ururinta liiskan.

Booqashada ka dib, falanqeynta warka la ururiyay wuxuu ICRC-da awood u siinaysaa inay ogaato khatarta dhabta ah ee ay la kulmayaan maxaabiista iyo waxyaabaha kale ee quseeya xaaladooda, oo ay kamid yihiin caqabadaha soo wajaha mas'uuliyiinta marka ay isku dayayaan inay wax ka qabtaan xaaladaha aadminimada.



## WAXQABADKEENA

Xaaladaha oo dhan, ICRC-da waxay la shaqeysaa mas'uuliyiinta xabsiyada waxayna ka rejeynaysaa inay qaadaan talaabooyinka lagama maarmaanka ah ee lagu xaqiijinayo hab dhaqan wanaagsan iyo xaaladaha xabsiyada. Gunta arintan, waxay la yeelataa wadahadalo qarsoodi oo laba geesood ah oo quseeya waxyaabihii ay ogaatay, xeerarka qaran iyo kuwa caalamiga ah ee la xiriira iyo talaabada iyo qeyraadka loo baahan yahay ee lagu hagaajinayo xaaladaha dadka laga qaaday xoriyadooda. Iyadoo ku saleynaysa qiimeynteeda iyo falanqeynteeda ee xaalad kasta, ICRC-da waxay diyaarinaysaa qorshe ay ku daboolayso baahida lahaystayaasha sida ugu haboon. Qorshahan waxaa ka mid noqon kara talaabo ay ICRC-du qaadayso oo la xiriira lahaystayaal gaar ah, qaab dhismeedka, hayaddaha iyo nidaamyadda maamulka iyo faragelin farsamo iyo mid maadi ah si ay wax ugu qabato baahida aadminimada. Inta ay fulinayo hawshan, ICRC-da waxay kormeeraysaa isla markaana kaabaysaa qorshahan si ay u xaqiijiso in waxqabadkeeda uu natiijo la taaban karo ku leeyahay xaalada lahaystayaasha.

ICRCdu waxay caawisaa dadka adduunka ee ay saameeyeen coladaha hubeysan iyo xaaladaha kale ee qalalaase, iyadoo sameynaya wax kasta oo ay awooddo si ay u ilaaliso sharaftooda una yareeyso dhibaatadooda, waxayna badiyaa la shaqeeysaa Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas. Hay'adda waxay kaloo raadinaysaa in ay ka hortagto caqabadaha iyadoo horumarinayso isla markaana xoojinayso xeerka aadamnimada, waxayna kale kor u qaadaa mabaadii'da bani'aadamnimada ee caalamiga ah.

facebook.com/ICRCAfrica
twitter.com/ICRC_Africa
www.instagram.com/icrc_somalia/
blogs.icrc.org/Somalia

**ICRC Somali Delegation**
Ngecha Road off Lower Kabete Road
P.O.Box 73226-00200
Nairobi-Kenya
T + 254 0709 132 000
SOK-Nairobi@icrc.org

**ICRC Mogadishu sub-delegation**
Wadjir District, Buulo Hubey Quarters
P.O. BOX 700
Mogadishu, Somalia
Email: mog_mogadiscio@icrc.org

**ICRC Garowe sub-delegation**
Halgn/zone A
House No. 0185
Jimaale Road
Garowe, Puntland-State
Somalia
Email: gar_garowe@icrc.org

**ICRC Baidoa sub-delegation**
Behind Somaphone tower
Mogadishu - Baidoa road
Email: bad_baidoa@icrc.org

**ICRC Kismayo sub-delegation**
Fanole section near Qacle junction
opposite Sadam2 Building
Kismayo, Somalia
Email: Kis_kismayo@icrc.org

**ICRC Beledweyne sub-delegation**
Madina Wadi Sharey
Beledweyne Kshon Section
Iridda Aamin road
Wadi building
Beledweyne, Somalia
www.icrc.org
© ICRC, May 2023

ICRC

1183/402 07.2024 2000
Sawirka: Abdikarim Mohamed/ICRC